



## THE NATIONAL IDENTIFICATION AND REGISTRATION LAW, 2023

Translated Version of the Law – English	Original Version of the Law -Somalia
<p><b>CHAPTER 1</b></p> <p><b>BASIC PROVISIONS</b></p> <p><b>Article 1</b></p> <p><b>The Name of the Law</b></p> <p>This law may be cited as the Public Registration and Identification Law</p>	<p><b>Cutubka 1aad</b></p> <p><b>Qodobbo Aasaasi ah</b></p> <p><b>Qodobka 1aad:</b></p> <p><b>Magaca Sharciga</b></p> <p>Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha.</p>
<p><b>Article 2</b></p> <p><b>The objectives of the Law</b></p> <p>This law serves the following objectives:</p> <ol style="list-style-type: none"><li>1) To effectuate the process of registration and legal identification of the citizens of the Federal Republic of Somalia to facilitate the access to the services needed and the rights they are entitled to by law.</li><li>2) To implement the functions of the Identification and</li></ol>	<p><b>Qodobka 2aad</b></p> <p><b>Ujeeddooyinka Sharciga</b></p> <p>Sharcigan wuxuu suurtagelinayaa ujeeddooyinka soo socda:</p> <ol style="list-style-type: none"><li>1. In la hirgeliyo hannaanka diiwaangelinta iyo aqoonsiga muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo si sharci ah u caddaynaya aqoonsiga muwaadinka una fududeynaya helidda dhammaan adeegyada uu u baahan yahay iyo xuquuqda sharcigu u oggolyahay;</li></ol>

<p>registration of persons by establishing a national authority to carry out its legally mandated responsibilities under the law;</p> <p>3) To issue an identification number that uniquely identifies the person;</p> <p>4) To create an identification system with security features that enable service providers (public or private) to confidently serve the citizens by reliably authenticating the credentials to verify the identity of the bearer of the document;</p> <p>5) To ensure that the Federal Government of Somalia has an identification system that is compliant with the international best practices on identification administration;</p> <p>6) To establish the national identification system on a legal basis to address the people's needs for identification system that will enable them to participate in their local and international economic activities;</p>	<p>2. In la taabo-geliyo hawlaha aqoonsiga iyo diiwaangelinta dadweynaha iyadoo la abuurayo hay'ad qaran oo fulisa howlaha iyo waajibaadka uu sharcigu u ignaday.</p> <p>3. In lagu bixiyo Tirsi Aqoonsi gaar ah kaas oo lagu aqoonsanayo qofka haysta tirsigaas;</p> <p>4. In la abuurto nidaam aqoonsi oo leh astaamo amni lagu xaqiijin karo aqoonsiga qofka si loo fududeeyo in dhammaan adeeg-bixiyaashu (hey'daha dowliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay) ay si kalsooni leh ula macaamilaan qofka sita aqoonsigaas iyaga oo ku kalsoon in qofkaasi uu yahay cidda uu sheeganayo;</p> <p>5. In Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay yeelato nidaam aqoonsi oo la mid ah nidaamyada caalamiga ah;</p> <p>6. In nidaamka aqoonsiga Dalka ku dhismo si sifo sharci oo ka jawaabaysa baahida aqoonsi ee dadweynaha ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kuwaas oo u baahan in ay helaan adeegyada aqoonsi ee u fududeyn lahaa macaamilkooda dhaqaale iyo xiriirradooda gudaha iyo dibeddaba.</p>
<p><b>Article 3</b> <b>Definitions</b></p> <p>In this Law, unless otherwise defined, the following terms shall have their respective meaning asbelow:</p> <p>1. <b>Authentication</b> means the process of proving that a person is who they claim to be;</p>	<p><b>Qodobka 3aad:</b> <b>Eray-bixin</b></p> <p>Haddii aan si kale loogu sheegin sharciga gudihiisa, ereyada hoos ku qoran mid waliba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:</p> <p>1. "Sugid" Waxaa loola jeedaa hab lagu xaqiijinayo in qofku yahay ruuxa uu sheeganayo;</p>

<ol style="list-style-type: none"> <li>2. <b>Authority</b>” means the National Identification and Registration Authority established under this law</li> <li>3. <b>Biometric</b> means any metrics related to unique biological or physical attributes and behaviours including fingerprints, irises and facial images;</li> <li>4. <b>Birth certificate</b> means the document issued to record a person’s birth in Somalia;</li> <li>5. <b>Council of Ministers</b> means the highest executive organ of the Federal Government of Somalia as stipulated in Article 97 of the Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia;</li> <li>6. <b>Data centre</b> means the location where data collected by the Authority is stored;</li> <li>7. <b>Director-General</b> means the director-general of the National Identification and Registration Authority;</li> <li>8. <b>Genealogy</b> means the relationship between registered members of a family, such as the parent-child relationship;</li> <li>9. <b>Foundational identification system</b> means an identification system primarily created to provide general identification and credentials to the individuals for public administration and a wide variety of public and private sector transactions, services, and derivative credentials;</li> <li>10. <b>Identification</b> means the process of establishing, determining, or recognizing a person’s identity;</li> <li>11. <b>Identity card</b> means the national identity card uniformly issued by the Authority across the country;</li> <li>12. <b>Minister</b> means the minister of the Ministry of Interior, Federal Affairs and Reconciliation;</li> <li>13. <b>Ministry</b> means the Ministry of Interior, Federal Affairs and Reconciliation;</li> </ol>	<ol style="list-style-type: none"> <li>2. Hay'adda" Waxaa loola jeedaa Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka - (National Identification and Registration Authority - NIRA) ee lagu asaasay Sharcigan;</li> <li>3. <b>"Xog-dhalyada"</b> (biometric) Wa.xaa loola jeedaa tilmaamaha la ximra waxyaabaha u goonnida ah qofka ee ka turjumaya qaybo ka mid ahjirkiisa sida faraha, midabka indhaha, muuqaalka wejiga, iyo qaar kale;</li> <li>4. <b>Warqadda Dhalasho"</b> Waxaa loola jeedaa caddaynta la siiyo qofka u dhashay Soomaaliya;</li> <li>5. <b>"Golaha Wasiirrada"</b> Waxaa loola jeeda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo ah hey'adda ugu sarraysa Laanta Fulinta ee Dowladda si waafaqsanQodobka 97aad ee Dastuurka Ku-meel gaarka ah eeJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya</li> <li>6. <b>Xarunta Xog-kaydinta"</b> Waxaa loola jeedaa barta lagu uruurinayo xogta ay Hay'addu hayso;</li> <li>7. <b>"Maareeye Guud"</b> Waxaa loolajeedaa Maareeyaha Guud ee Hay'adda;</li> <li>8. <b>"Abtirsi"</b> Waxaa loolajeedaa xiriirka ka dhexeeya xubnaha qoys la diiwaan- geliyey sida waalidka iyo carruurtooda;</li> <li>9. <b>"Habka Aqoonsashada Asaasiga"</b> Waxaa loola jeedaa hab qofka lagu aqoonsanayo oo loo abuuray inuu dadka u siiyo aqoonsasho loo adeegsado maamulka iyo macaamilka uu qofku la yeesho hey'daha dowliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay;</li> <li>10. <b>"Aqoonsasho"</b>Waxaa loola jeedaa hannaanka lagu hubinayo, lagu aqoonsanayo lagaga go'aan-gaarayo qofka uu yahay;</li> <li>11. <b>Kaar-aqoonsi"</b> Wa.xaa loola jeedaa kaarka aqoonsiga Qaranka ee ay Hay'addu si midaysan uga bixiso dalk.a oo dhan;</li> <li>12. <b>Wasiirka"</b> Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u- heshiisiinta;</li> <li>13. <b>Wasaaradda"</b> Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;</li> </ol>
---	---

<p>14. <b>Personal information</b> means information relating to the person that is registered in the system such as the name of the person, the name of the mother, the name of the father, and the date of birth;</p> <p>15. <b>Registration</b> means the registration of individuals' personal information in the system;</p> <p>16. <b>System</b> means the foundational identification system;</p> <p>17. <b>Unique identification number</b> means a number that uniquely identifies a person for their lifetime</p>	<p>14. <b>Xog-horaadda"</b> Waxaa loola jeedaa macluumaadka laga diiwan-gelinayo qof walba sida magaca qofka, magaca aabbaha, magaca hooyada iyo taariikhda dhalashada;</p> <p>15. <b>Diiwaangelin"</b> Waxaa loola jeedaa xogta qofka oo lagu diiwaangeliyo si sharciga waafaqsan;</p> <p>16. <b>Nidaain"</b> Waxaa loolajeedaa habka aqoonsashada asaasiga ah;</p> <p>17. "Tirsi Aqoonsi" Waxaa loola jeeda lambar aan taxane aheyn oo hal mar la isticmaalayo una goonni ah hal qof kaas oo qofka leh tilmaan soocaysa inta uu nool yahay iyo marka uu dhinto kadib.</p>
<p><b>Article 4</b> <b>Eligibility of the identification</b></p> <p>1) The Citizens of the Federal Republic of Somalia and anyone who is a legal resident of the country, except for those who are on a short visit, have the right to be registered and issued an identity card and other related documents, and the procedures shall vary based on the type of identification.</p> <p>2) The Minister, considering the recommendations of the Authority, shall introduce regulations detailing the implementation process of the national identification system.</p>	<p><b>Qodobka 4aad:</b> <b>Xaqa Helidda Aqoonsiga</b></p> <p>1. Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo qof walba oo si sharci ah u degan dalka marka laga reebo kuwa ku jooga booqashada gaaban waxay xaq u leeyihiin in la diinwaangeliyo lana siiyo aqoonsi iyo dokumintiyada kale laguna kala duwayo habraaca iyo nooca aqoonsiga.</p> <p>2. Wasiirka, isagoo tixgelinaya talo-bixinta Hay'adda, wuxuu soo saarayaa Xeer- nidaamiye faahfaahinaya hannaanka fulinta diiwaangelinta Aqoonsiga Qaranka.</p>
<p><b>Article 5</b> <b>Individual Identity Proofing Procedure</b></p> <p>1. Everyone being issued an identity card shall furnish documents that proof his identity;</p> <p>2. The requirements for the registration shall be simplified to</p>	<p><b>Qodobka Saad:</b> <b>Habraaca Sugidda Qofka</b></p> <p>1. qof walba oo qaadanaya kaarka aqoonsiga waa in la sugi karaa isaga oo la imaanaya dukumiinti ama wax u dhigrna oo caddeynaya qofnimadiisa.</p>

<p>allow the public to get the identification.</p>	<p>2. Shuruudaha diiwaangelintu waa inay fududaadaan una oggolaadaan dadweynaha in ay helaan adeegyada aqoonsi ee ay u baahan yihiin.</p>
<p><b>Article 6: The Issuance of the Identity Card</b></p> <p>The fees for the issuance of the national ID number, the card and other services shall be specified in a regulation to be issued by the Minister.</p>	<p><b>Qodobka 6aad: Bixinta Kaadka Aqoonsiga</b></p> <p>Bixinta Tirsiga, Daabacista Kaarka Aqoonsiga iyo adeegyada aqoonsi ee kale waxaa khidmadda lagu jaangoynayaa xeer-nidaamiye uu soo saarayo vVasiirku.</p>
<p><b>Article 7: Grievance Handling</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. The Authority shall implement a multi-layer complaint and grievance management system for the issues related to the access and use of the identification.</li> <li>2. The Authority will introduce a technology-based grievance management system and procedures</li> <li>3. The complaints that the authority fails to address in a timely manner as per the relevant by-laws will be escalated to the Minister.</li> <li>4. The Minister's final decision on an escalated complaint from the authority may be appealed at a court of competent jurisdiction.</li> </ol>	<p><b>Qodobka 7aad: Maareynta Cabashooyinka</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Hay'addu waxay hirgalinaysaa nidaam lagu maareeyo cabashooyinka iyo tabashada ka timaada helidda iyo isticmaalka kaarka aqoonsiga kaasoo yeelan doona heerar kala duwan.</li> <li>2. Hay'addu waxay soo saari doontaa Habraaca Xallinta Cabashooyinka oo loo hirgalin doono hab casriyaysan.</li> <li>3. Cabashooyinka muwaadiniinta ee hay'addu u xalin weydo sidii la rabey ama lagu xallin waayey muddada ku xusan Xeer-hoosaadka, waxa ay u gudbeysaa Wasiirka.</li> <li>4. Go'aanka kama dambaysta ah ee Wasiirka ee ku saabsan cabashada laga soo qaatay Hay'adda waxaa looga dacwoon karaa Maxkamadda awoodda u leh.</li> </ol>
<p><b>Article 8</b></p>	<p><b>Qodobka 8aad:</b></p>

<p><b>Data to be Registered</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. No sensitive data, that may lead to discrimination or marginalization, may be collected nor recorded.</li> <li>2. No data shall be used for any purpose other than that collected for except for that permissible by the law.</li> <li>3. Only the following data shall be registered. <ol style="list-style-type: none"> <li>a. The name of the subject person, his/her father's name, his/her grandfather's and the surname up to fourth lineage.</li> <li>b. Titles/prefixes such as Haji, Sultan, Sheikh, Ugas, Garad, Sharif, Macallin etc cannot berejected</li> <li>c. Mother's full name (up until grandfather).</li> <li>d. Date of birth (day, month and year).</li> <li>e. Place of birth (district, region and country)</li> <li>f. Place of residence</li> <li>g. Sex (female or male)</li> <li>h. Passport size photo</li> <li>i. Fingerprints (ten fingers) and/or IRIS</li> <li>j. Telephone number and/or email address.</li> <li>k. Legal status (citizen or refugee, etc).</li> </ol> </li> <li>3. The data proofing the identity of the person which appears on the document.</li> <li>4. The collected data should be stored at data center of the Authority.</li> </ol>	<p><b>Xogta La Diiwaangelinayo</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Lama uruurin karo xog xasaasi ah oo keeni karta in qofka la takooro ama la faquuqo.</li> <li>2. Xogta la diiwaangeliyay looma isticmaali karo ujeedooyin ka baxsan ujeeddada loo qabtay marka laga reebo inta sharcigu oggol yahay.</li> <li>5. Xogta la diiwaangelinayo waa in ay ku koobnaato waxyaabaha soo socda: <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Magaca qofka oo la xeriiro magaca aabaha iyo kan awoowaha, ama magaca qoyska oo afaran.</li> <li>b. Lama diidi karo Magacyada, sida Xaaji, Suldaan, Shiikh, Ugaas, Shariif, Garaad, Macallim iwm.</li> <li>c. Magaca hooyada (oo saddexan);</li> <li>d. Taariikhda uu qofku dhashay (maalinta,bisha iyo sannadka);</li> <li>e. Goobta uu ku dhashay (Degmada, Gobolka, Waddanka);</li> <li>f. Deegaanka uu deggan yahay;</li> <li>g. Jinsiga (dhedig ama lab);</li> <li>h. Sawirka qofka (teesare);</li> <li>i. Raadka faraha (1Oka farood) iyo/ama sumadda indhaha (IRIS);</li> <li>j. Lambarka telefoonka iyo/ama "emailka" qofka;</li> <li>k. Xaaladda sharci (Muwaadin, Qaxooti,iwm.)</li> </ol> </li> <li>3. Xogta sugidda aqoonsiga qofka ee ku soo baxay dukumiinti.</li> <li>4. Xogta la ururiyay waxa lagu keydinayaa xarun ta xog-dhiggista Hay'adda.</li> </ol>
<p><b>CHAPTER 2</b></p>	<p><b>Cutubka 2aad:</b></p>

<p><b>Establishment of the Authority</b></p> <p><b>Article 9 - Establishment</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. The National Identification and Registration Authority is hereby established by this law.</li> <li>2. The Authority has a legal personality that enables it to implement its duties and responsibilities.</li> <li>3. The Authority’s headquarters is Mogadishu, the capital city of Somalia; and it will have branches in the main cities of the country and wherever deemed necessary.</li> <li>4. With the consideration of the authority’s recommendations, the Minister will issue a formal directive in regards with the emblem of the authority.</li> </ol>	<p><b>Dhismaha Hay’adda</b></p> <p><b>Qodobka 9aad</b> <b>Asaasid</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Waxaa Sharcigan lagu asaasay "Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka".</li> <li>2. Hay'addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni ah oo ay ku maareyso arrimaheeda.</li> <li>3. Xarunta Dhexe ee Hay'addu waa Caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho waxayna laamo ku yeelanaysaa magaalooyinka waaweyn ee dalka iyo hadba meeshii kale ee ay u baahato.</li> <li>4. Wasiirku, isagoo tixgelinaya tala-bixinta hay'adda, wuxuu go'aan maamul ku soo saarayaa astaanta ay yeelanayso Hay'adda.</li> </ol>
<p><b>Article 10</b> <b>Objectives of the Authority</b></p> <p>The main objective of the Authority shall be to:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Ensure that citizens are identifiable and that the identity document and unique identification number they hold enables them access to the services they need;</li> <li>2. Strengthen the coordination and cooperation of public and private institutions that provide services for which the identification of persons is important and digitally integrate the public services</li> </ol>	<p><b>Qodobka 10aad:</b> <b>Ujeeddoyinka Hay’adda</b></p> <p>Ujeeddooyinka loo asaasay Hay'adda waxaa ka mid ah:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. In muwaaddiniinta ay noqdaan dad la aqoonsan karo oo dukumiintiga aqoonsiga ay sitaan iyo tirsiga aqoonsi ee u goonida ah uu noqdo mid sahlaya adeegyada ay u baahan yihiin;</li> <li>2. Inay xoojiso isku-dubbaridka iyo wax-wada-qabadka shaqooyinka hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada ay aqoonsashada qofku muhiimka u tahay iyo isku xirka adeegyada dowladda qaab elektaroonik ah.</li> </ol>



<ol style="list-style-type: none"> <li>3. Establish and maintain a data center to store the data on the identification of the people and other relevant data crucial to the government</li> <li>4. Contribute to the growth of the national economy, development of the economic opportunities, preventing duplication of services, and human right violations which might be caused by lack of identification</li> </ol>	<ol style="list-style-type: none"> <li>3. In ay abuurto, kuna heyso xogta aqoonsiga xarunta xog-dhigista ee hay'adda taasoo keydinaysa dhammaan xogaha dadweynaha ee muhiimka u ah dawladda;</li> <li>4. Inay gacan ka geysato koboca dhaqaalaha Qaranka, horumarinta fursado dhaqaale, ka-hortagga is-dulbuurad dhanka adeeg-bixinta iyo ku-xadgudub xuquuqaha aadamiga oo ka dhalan kara aqoonsasho la'aan.</li> </ol>
<p>CHAPTER 3</p> <p><b>FUNCTIONS, POWERS AND STRUCTURE OF THE AUTHORITY</b></p> <p><b>Article 11aad Functions of the Authority</b></p> <p>The Authority shall perform the following functions:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Establish, operationalize, and manage a foundational identification system which allows for the registration of the citizens and persons who are lawfully resident in Somalia;</li> <li>2. Register in the system and assign a unique identification number to all citizens and those lawfully resident in Somalia;</li> <li>3. Issuance of a national identity card;</li> <li>4. Responsible for the development of services related to registrations and population identification data storage in coordination with the Ministry to manage and storage the electronic registration system and the management of the registration data centres.</li> </ol>	<p><b>Cutubka 3aad:</b>  <b>Hawlaha, Awoodaha, Iyo Qaab-Dhismeedka Hay'adda Qodobka 11aad</b></p> <p><b>Qodobka 11aad Hawlaha Hay'adda</b></p> <p>Hay'addu waxay qabanaysaa hawlahaan soo socda:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Inay abuurto, ka shaqaysiiso, maamusho oo ay dhawrto nidaam maarayn aqoonsi oo asaasi ah, si ay u suurta-gasho in qofkasta oo muwaaddin ah ama si sharci ah ugu nool Soomaaliya la diwaangeliyo;</li> <li>2. In mawaaddiniinta ku diwaangeliso nidaamka ayna siiso tirsi aqoonsi oo u gooni ah oo lagu aqoonsan karo;</li> <li>3. Inay bixiso kaar aqoonsi ee heer Qaran;</li> <li>4) In ay mas'uul ka rahay barnaamijyo lagu hormarinayo adeegyada la xiriira diiwaangelinta iyo keydinta xogta aqoonsiga dadweynaha oo ay kala shaqaynayso wasaaradda sidii loo maarayn lahaa nidaamyada elektaroonigga ah ee diiwaangelinta iyo</li> </ol>



<p>5. Implement trainings on/for civil registrations system and provide technical support;</p> <p>6. Provide individuals with information related to the status of their registration;</p> <p>7. Protect the privacy of the biometric data and personal information collected by the Authority and to manage it responsibly in accordance with the Law;</p> <p>8. Coordinate the integration of the national ID system with the other public and private sector institutions that provide services requiring the national ID following agreed procedures;</p> <p>9. Conduct researches on the most effective ways of carrying out the functions, and be keen on the general advancements related to the identification management sector to share knowledge and experiences with other public and private institutions on matters related to identification;</p> <p>10. Effectively coordinate with and build the capacity of branches that the Authority may open across the country;</p> <p>11. Promote the use of the foundational identification system to advance the political, socio-economic and security interests of</p>	<p>maamulka xogdhigista ay ku kaydinayso diiwaangelinta xogta aqoonsiga dadweynaha;</p> <p>5) In ay hirgeliso tababarada nidaamka diiwaangelinta madaniga ah iyo qorshayaasha taakulayma farsamo;</p> <p>6) i nay shakhsiyaadka siiso xogta la xiriira xaaladdooda diiwaangelineed;</p> <p>7) In ay hubiso dhawrsoonaanta xog-dhalyada iyo xog-horaadda shakhsiyaadka ee ay Hay'addu ururisay, una maarayso si xilkasnimo leh oo waafaqsan Sharciga;</p> <p>8) In ay qaab elektaroonik ah isugu xirto xarunta xog-dhigista iyo hay'adaha Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee bixiya adeegyada uu aqoonsigu muhiimka u yahay, taas oo loo marayo habraacyo;</p> <p>9) Inay cilmi-baaris ku samayso sida ugu waxtarka roon iyo waxyaabaha guud ee ku soo kordha sida loo maareeyo aqoonsiyada hay'adaha kale ee Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn, isla markaasna ay la wadaagto xogta ama waayo'aragnimada la xiriira aqoonsashada;</p> <p>10) Inay si wax-ku-ool ah isugu duwdo, tayo ahaanna u dhisto laamaha ay Hay'addu ka furato dalka;</p> <p>11) Si loo hormariyo mudnaanshaha siyaasadda, dhaqaale, bulsho iyo arnni ee dalka; 1yo</p>
--	--

<p>the country; and</p> <p>12. Perform, to the extent permitted by the Law, such other duties necessary or expedient for the discharge of its functions under this Law</p>	<p>12)Inay fuliso, hadba inta sharcigu u oggolanaayo, wixii hawl kale ah oo muhiim u ah ama ku habboon gudashada waajibaadkeeda.</p>
<p><b>Article 12</b> <b>Cooperation and Collaboration</b></p> <p>1. The Authority shall cooperate with ministries, departments and other government agencies in the implementation of this Law.</p> <p>2. All private entities/institutions shall cooperate with the Authority to ensure the proper discharge of its functions in accordance with the law.</p> <p>3. All citizens of the Federal Republic of Somalia shall register and obtain the unique identification number.</p>	<p><b>Qodobka 12aad:</b> <b>Wadashaqeynta iyo Iskaashiga</b></p> <p>1) Hirgelinta sharcigan waxay Hay'addu iskaashi kala yeelanaysaa Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda.</p> <p>2) Dhammaan Hay'adaha gaarka loo leeyahay, wa.xaa waajib ku ah in ay Hey'adda kala shaqeeyaan fulima howlaheeda si waafaqsan sharcigan.</p> <p>3) Dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah in ay is diiwan-geliyaan, qaataanna tirsi gooni u ah.</p>
<p><b>Article 13</b> <b>Powers of the Authority</b></p> <p>1. The Authority without going beyond powers conferred by this law, shall have the power to do everything that may be necessary or expedient for the purpose of carrying out its functions</p> <p>2. Without restricting the generalities of the preceding sub-article and the powers inherent in the Authority's legal personality, the Authority shall, in particular, have the power to:</p> <p>a. Sue and be sued;</p> <p>b. enter into agreements related to its work;</p>	<p><b>Qodobka 13aad:</b> <b>Awoodaha Hay'adda</b></p> <p>1) Hay'addu, iyadoo aan dhaafayn xeyndaabka Sharcigu xadeeyey, waxay awood u leedahay wax kasta oo daruuri u ah ama ku habboon sidii ay u gudan lahayd hawlaheeda.</p> <p>2) Iyadoon la xadayneyn sida guud ee faqradda hore u dhigan tahay iyo awoodaha ka ratibmaya in Hay'addu leedahay shakhsiyad qaanuuni ah, Hay'addu waxay si gaar ah awood ugu leedahay:</p> <p>a. In ay dacwad soo oogi karto, laguna soo oogi karo;</p>

<ul style="list-style-type: none"> <li>c. acquire, hold and sell it's property in accordance with the National Procurement Law</li> <li>d. accept equipment or funds donated to it in accordance with the laws</li> <li>e. Hire and dismiss staff in accordance with the Civil Service Law; and</li> <li>f. Collaborate or delegate to another party its functions related to the implementation of national identification system in accordance with National public procurement Law.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>b. In ay geli karto heshiisyada la xiriira shaqadeeda;</li> <li>c. Inay iibsano karto, haysano karto ama iska iibin karto hantideeda si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka;</li> <li>d. Inay qaadato wixii qalab ama dhaqaale ah ee loogu deeqo si waafaqsan shuruucda dalka u taalla;</li> <li>e. In iyadoo raacaysa Sharciga Shaqaalaha Rayidka lagu maamulo ay qorato, shaqadana ka eryi karto shaqaalaheeda; iyo</li> <li>f. In ay kala shaqayn karto ama u idman karto dhinac kale hawlaha la xiriira hirgelima nidaamka aqoonsiga si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.</li> </ul>
<p><b>Article 14</b> <b>Powers of the Ministry</b></p> <p>In accordance with this law, the Ministry shall have following powers</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>1. <b>Introduce</b> general policies for public identification</li> <li>2. Planning and development of the laws necessary for the Authority functions</li> <li>3. Supervise the functions of the Authority in line with the provision of this law</li> <li>4. Represent the Authority before the Council of Ministers and the Federal Parliament of Somalia</li> </ul>	<p><b>Qodobka 14aad:</b> <b>Awoodaha Wasaaradda</b> Si waafaqsan Sharcigaan, Wasaaraddu waxay yeelanaysaa awoodaha soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>1. Dejinta siyaasadaha guud ee aqoonsiga dadweynaha;</li> <li>2. Ka-baaraandegista iyo curinta shuruucda ay hay'addu u baahan tahay;</li> <li>3. Kor-joogteynta hawlaha hay'adda iyada oo ku ilaalinaysa qodobbada sharcigan;</li> <li>4. metelaadda hay'adda ee golaha wasiirrada iyo goleyaasha baarlamaankaba.</li> </ul>
<p><b>Article 15</b> <b>Board of Directors of the Authority</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>1. Authority shall have a Board of 9 members, which shall comprise of the Director General and 8 members from Ministries and office Solicitor General, they are as following</li> </ul>	<p><b>Qodobka 15aad</b> <b>Guddiga Maamulka Hay'adda (Board of Directors)</b> 1) Hay'adda waxay yeelanaysaa Guddi Maamul oo 9 xubnood ah kana kooban Maareeyaha, iyo 8 xubnood oo ka kala imaanaya wasaaradaha iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud, waana sida</p>

<p>A. The Ministry of Interior, Federal Affairs and Reconciliation – Member</p> <p>B. The Ministry of Health– Member</p> <p>C. The Ministry of Internal Security; - Member</p> <p>D. The Ministry of Post, Communications and Technology; - Member</p> <p>E. The Ministry of Commerce and Industry - Member</p> <p>F. The Ministry of Finance – Member</p> <p>G. The Ministry of Labor and Public Affairs - Member</p> <p>H. Office of the Solicitor General</p> <p>2. Each Minister shall appoint his/her respective member based on his/her knowledge and experience related to Authority’s functions</p> <p>3. Board Members shall be entitled to allowances to be determined by the Minister.</p> <p>4. The Director General of the Authority is the chairman of the Board of Directors. In the absence of the Director General, the board will be chaired by the Deputy Director.</p> <p>5. If a member of the Board of Directors vacates his position, the seat will be filled in accordance with sub-article 2 of this article.</p>	<p>soo socto:</p> <p>A. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, (xubin)</p> <p>b. Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, (Xubin)</p> <p>c. Wasaaradda Amniga Gudaha, (Xubin)</p> <p>D. Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda, (Xubin)</p> <p>d. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, (xubin)</p> <p>e. Wasaaradda Ilaalinta, (Xubin)</p> <p>f. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada,(Xubin)</p> <p>g. Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowallada,(Xubin)</p> <p>2. Xubinta wasaarad kasta waxa soo magacaabaya wasiirka ay khusayso, isaga oo kusoo xulaya aqoon iyo khibrad shaqo oo la xiriirta hawlaha hey'adda.</p> <p>3. Xubnaha guddiga maamulka waxay yeelanayaan gunno uu go'aamiyo Wasiirka.</p> <p>4. Maareeyaha guud ee hay'adda waa guddoomiyaha guddiga maamulka (board of directors). Marka uu maareeyuhu maqan yahay waxaa shir guddoonka qabanaya Maareeye Ku-xigeenka.</p> <p>5. Haddii xubin guddiga kabanaanato waxaa lagu soo buuxinayaa si waafaqsan faqradda 2aad ee Qodobkan.</p>
<p><b>Article 16</b> <b>Responsibilities of the Board of Directors</b></p> <p>The Board of Directors shall perform the following responsibilities:</p> <p>1. Ensure and approval of the Authority’s annual plan once submitted by the Director General of the Authority;</p> <p>2. Hearing the annual report of the Authority;</p> <p>3. Approve by-laws and procedures of the Authority;</p>	<p><b>Qodobka 16aad:</b> <b>Waajibaadka Guddiga Maamulka</b></p> <p>Guddiga Maamulka wuxuu u xilsaaran yahay</p> <p>1. Hubinta iyo ansixinta qorshe hawleedka Ha'yadda kadib marka uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud ee hay'adda.</p> <p>2. Dhageysiga warbixinta sanadlaha ah ee hay'adda.</p>

<p>4. Assess and approve the budget and Financial Report of the Authority.</p>	<p>3. Ansixinta xeer hoosaadka iyo habraacyada hay'adda. 4. Ka-baaraandegista iyo ansixinta miisaaniyadda Hay'adda iyo ansixinta xisaab xirkeeda.</p>
<p><b>Article 17</b> <b>Meetings of the Board of Directors</b></p> <p>1. The Board shall convene an ordinary meeting at least once every four months. 2. The Board may convene an extraordinary meeting upon the call of the . Minister Chairman of the Board of Directors 5. The Quorum of meetings and decision of the Board shall be approved in 50%+1 vote. The chairman of the board shall vote only when the votes are a tie. 5. The Authority shall prepare by-laws that govern the meetings of the Board and submit them to the minister for approval.</p>	<p><b>Qodobka 17aad:</b> <b>Kulamada Guddiga Maamulka</b></p> <p>1. Kulmada caadiga ah ee guddiga waxay qabsoomayaan afartii biloodba halmar. 2. Guddigu waa in uu kulmaa markasta uu isugu yeero: 3. Wasiirka; 4. Guddoomiyaha guddiga 5. Gumanka kulamada guddiga iyo go'aanna doodu waxay ku ansaxayaan tiro hal dheeriya (50%+ 1). Guddoomiyaha wuxuu codeeynayaa kaliya marka ay codadku isle ekaadaan. 6. Hay'addu waxay diyaarinaysaa xeer-hoosaad lagu maaraynayo kulamada guddiga, una gudbinaysaa Wasiirka si uu u oggolaado.</p>
<p><b>Article 18</b> <b>Administration Structure</b></p> <p>1. The Authority shall be composed of a. A Director General, b. A Deputy Director c. Departmental Directors and d. staff. 2. The organizational structure of the Authority shall be proposed by the Director General and approved by the Minister.</p>	<p><b>Qodobka 18aad:</b> <b>Qaab-dhismeedka Maamulka</b></p> <p>1)Hay'addu waxay yeelanaysaa: b. Maareeye Guud; c. MaareeyeKu-xigeenGuud; d. Agaasime waaxeedyo; iyo e. Shaqaale. 3. Qaab-dhismeedka Hay'adda waxa soo saaraya Maareeyaha Guud, waxaana meelmarinaya Wasiirka.</p>

**Article 19****Appointment of the Director General and Deputy Director General**

1. The Minister of Interior, shall propose the appointment of the Director General and Deputy Director General of the Authority to the Cabinet to endorse, and then the president of the Federal Republic of Somalia shall appoint the Director-General and Deputy Director General as stipulated article 90 clause (k) and Article 99 of the Federal Provisional Constitution, and issue the directive on the official bulletin of the federal Republic of Somalia.
2. The Procedure for the dismissal of the Director General and Deputy Director General shall follow the procedures stated in the preceding sub-article (19(1) of this law.

**Qodobka 19aad:****Magacaabista Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa**

1. Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana meel marinaya Golaha Wasiirrada, kadibna waxaa Xeer Madaxweyne ku soo magacaabaya Madaxweynaha JFS sida ku xusan Qodobka 90aad, Xarafka (K) iyo Qodobbada 99aad ee Dastuurka, isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.
2. Xil-ka-qaadista Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waxaa loo marayaa habraaca ku cad faqradda laad ee Qodobkaan.

**Article 20 Eligibility Requirements of the Director-General and Deputy Director General**

The Director-General and Deputy Director of the Authority shall satisfy the following requirements:

1. be a Somali citizen and a Muslim;
2. be of sound mind;
  - a. Not younger than thirty year of age;
3. Hold a university degree
4. Have at least five (5) years of work experience as well as have managerial and administration experience

**Qodobka 20aad:****Shuruudaha looga baahan yahay Maareeyaha Guud iyo Ku xigeenka Maareeyaha Guud**

Qofka loo magacaabayo Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waa in laga helaa shuruudahan soo socda:

- 1) Inuu yahay muwaaddin Soomaaliyeed Muslim ah.
- 2) In dhimirkiisu fayow yahay;
- 3) Inda'diisu aanay ka yarayn 30 sano;
- 4) Inuu haysto shahaado heer-jaamacadeed;
- 5) Inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo oo aan ka yarayn (5) sano, khibradna u leeyahay maamulka iyo maaraynta;
- 6) Inaan si kama danbeys ah maxkamadi ugu xakumin danbi 5tii sano ee ugu danbeevse.;

<p>5. Must not have been convicted of crime by court in the last five (5) years.</p>	
<p><b>Article 21</b></p> <p>Disqualification and Suspension of the Director-General and Deputy Director General</p> <p>1. Director-General and Deputy Director shall cease to hold office where:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Mental illness certified by a reputable physician;</li> <li>b. Death;</li> <li>c. Failure to perform duties in accordance with the procedures and the Authority's regulations;</li> <li>d. Criminal conviction by a competent court and;</li> <li>e. accepted Resignation</li> </ol> <p>2. The Minister may suspend the Director or his deputy for the following reasons: Failure to comply with the Minister's supervisory instructions in accordance with this Law; and Violation of this law, its regulations, and other laws of the country.</p>	<p><b>Qodobka 21aad:</b></p> <p><b>Xil-Waayidda iyo shaqo kajoojinta Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa Xilka waxay kuweyn karaan:       <ol style="list-style-type: none"> <li>a) Xanuun xagga dhimirka ah uu soo caddeyo dhakhtar lagu kalsoon yahay;</li> <li>b) Geeri</li> <li>c) Xil-gudasho la'aan si waafaqsan habraacyada waajibaadka shaqo ee hay'adda.</li> <li>d) Dembi-ciqaabed ay soo caddeysay maxkamadda awoodda u leh; iyo</li> <li>e) Iscasilaad laga aqbalay.</li> </ol> </li> <li>2. Wasiirku wuxuu shaqo-ka joojin ku samayn karaa Maareeyaha ama ku-xigeenkiisa sababaha soo socda dartood:</li> <li>3. U hoggaansamid la'aan faritaanada korjoogteened ee Wasiirka si waaafaqsan sharcigan; iyo</li> <li>4. Ku xadgudubidda sharcigaan, xee - nidaamiyeyaalkiisa iyo shuruucda kale ee dalka.</li> </ol>
<p><b>Article 22</b></p> <p><b>Powers of the Director General</b></p>	<p><b>Qodobka 22aad</b></p> <p><b>Awoodaha Maareeyaha Guud waa sida soo socota:</b></p>



<p>The Director General has following powers:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Develop, implement and oversee the strategic plan of the Authority;</li> <li>2. Develop organizational structure, and procedures to perform the functions of the Authority;</li> <li>3. Prepare the annual budget of the Authority;</li> <li>4. Recruit, and dismiss the Authority staff in accordance with the Civil Services Law</li> <li>5. Represent the Authority legally and entering into agreements on behalf of the Authority;</li> </ol>	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Dejinta, lasocodka, hirgelinta iyo kormeerka qorshaha shaqo ee Hay'adda;</li> <li>2. Diyaarinta qaab dhismeedka iyo habraacyada lagu socodsiiyo hawlaha Hay'adda;</li> <li>3. Diyaarinta miisaaniyad-sanadeedka Hay'adda;</li> <li>4. Qorista iyo xil-ka-qaadista shaqaalaha Hay'adda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka; iyo</li> <li>5. Matalaadda Hay'adda dhinaca Sharciga iyo gelista heshiisyada</li> </ol>
<p><b>Article 23</b></p> <p><b>Deputy Director General</b></p> <p>Deputy Director General is responsible for:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Representing the director-general when he/ she is absent; and</li> <li>2. Performing any other duties as may be assigned to him/her by the Director General.</li> </ol>	<p><b>Qodobka 23aad:</b> <b>Xilka Ku-xigeenka Maareeyaha Guud</b></p> <p>Ku-xigeenka Maareeyaha guud wuxuu u xil saran yahay:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Qabashada xilka Maareeyaha Guud marka uu shaqada ka maqan yahay; iyo</li> <li>2. Qabashada wixii hawl kale ee Maareeyaha Guud si gaar ah ugu igmado.</li> </ol>
<p><b>Article 24</b></p> <p><b>Directors and Officers of the Authority</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. The Authority shall have departmental directors, who lead the functions the Authority;</li> <li>2. The Authority shall employ officers and temporary staff to perform its functions and mandate;</li> </ol>	<p><b>Qodobka 24aad:</b> <b>Agaasinnada iyo howlwadeennada Hay'adda</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Agaasin waaxeedyo hoggaamiya waaxaha Hay'adda.</li> <li>2. Hay'addu waxay shaqaalaysiinaysaa howlwadeenno iyo shaqaale ku kaalmeeya fulinta howlaheeda iyo xilkeeda.</li> </ol>

<ol style="list-style-type: none"> <li>3. The recruitment, deployment, discipline and dismissal of directors, officers and other staff shall be in accordance with the Civil Service Law;</li> <li>4. The Authority shall have branches and sub-branches that implements its functions in the Federal Republic of Somalia;</li> </ol>	<ol style="list-style-type: none"> <li>3. Qorista, shaqo-gelinta, anshax-marinta iyo shaqo ka saaridda agaasimeyaalka, howlwadeennada iyo shaqaalaha kaleba waxaa loo waafajinayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka.</li> <li>4. Hay'addu waxay kaloo yeelanaysaa laamo iyo faracyo ka hirgeliya hawlaheeda dhulkaJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.</li> </ol>
<p><b>Article 25</b></p> <p><b>The Oath of the Office</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. The data centre shall be located at the Authority's locations in the country, and it is unlawful to store the data outside the Authority offices. The individuals in charge the date shall be Somali citizens, who took Oath of confidentiality in words and in writing.</li> <li>2. Upon recruitment, all data administrators of the Authority shall take an oath of data protection before the Director General and Civil service Commission, and thereafter, shall sign a data protection agreement, that states the consequences of any disclosure of public information;</li> <li>3. The oath cited in the preceding sub-article of this article shall not substitute any other oath that the law obliges the employee to take;</li> <li>4. The duties imposed by the Oath on the employee of the Authority will be legally binding even if the employee leaves the job for retirement or any other reason;</li> <li>5. Procedures for the oath of confidentiality shall be detailed in the regulations of the Authority;</li> </ol>	<p><b>Qodobka 25 aad</b></p> <p><b>Dhaarta Xafiiska</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Xog-dhigista waa inay taallaa xarumaha Hay'adda ee dalka gudihiisa ah, waxaana ka reeban in lagu hayo ama la geeyo meel ka baxsan xarumaha rasmiga ah ee Hay'adda, dadka gacanta ku hayaana waa in ay yihiin dad Soomaali ah oo la dhaariyey, lagana saxiixay qoraal.</li> <li>2. Shaqaalaha Hay'adda ee u xilsaaran maamulka xogta inta aysan billaabin shaqada loo igmadey waa in Maareeyaha Guud hortiisa iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ku maraan dhaarta ilaalinta xogta dhawrista u baahan ee Hey'adda, waana in laga saxiixaa heshiis xog-ilaalined, loona caddeeyaa cawaaqibta ka dhalan karta bixinta xogta dadweynaha.</li> <li>3. Dhaarta lagu xusay faqrada hare ee qodobkan ma beddeleyso dhaar kale oo Sharcigu ku waajibiyo shaqaalaha.</li> <li>4. Waajibaadkii ay dhaartu saartay qofka shaqaalaha ka ah Hay'adda, kama dulqaadeyso xitaa haddii uu shaqada uga tago hawlgab awgeed ama sabab kasta oo kale.</li> <li>5. Habraaca dhaarta iyo xog-ilaalinta la xiriira waxaa si faahfaahsan loogu soo saari doonaa Xeer-nidaamiye Hay'adda.</li> </ol>

<p><b>Article 26</b> <b>Authority Budget</b></p> <p>The Authority shall have its own budget sourced from:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. The Federal Government of Somalia General Budget</li> <li>2. Revenue earned from the services the Authority delivers which should be managed in line with the Public Financial Management Law of Federal Government</li> <li>3. Budget support from local and international donors that follow the Public Financial Management Procedures;</li> <li>4. The Director General of the Authority shall, not later than October 30<sup>th</sup> in each year, prepare the Authority budget plan for next financial year, showing the forecasted expenditure and revenue and submitted it to the Board and then to the Ministry of Finance</li> </ol>	<p>Qodobka 26aad Miisaaniyadda Hay'adda Hay'addu waxay yeelanaysaa misaaniyad u gaar ah oo ka imanaysa:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Miisaaniyadda guud ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;</li> <li>2. Dakhliga laga helo adeegyada ay Hay'addu fuliso waxaa loo marayaa si waafaqsan habraaca Sharciga maamulka maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya</li> <li>3. Kaalnada miisaaniyadeed ee laga helo deeq-bixiyeyaasha gudaha iyo dibadda si waafaqsan habraac maaliyadeedka Dawladda.</li> <li>4. Maareeyaha Guud ee Hey'adda waa in uu sanad walba ugu dambeyn 30ka Oktoobar uu diyaariyaa qorshaha Miisaaniyad-sanadeedka Hey'adda, taasoo muujineysa dhammaan kharashka iyo dakhliga ee la filayo, una gudbiyo guddiga maamulka, ka dibna Wasaaradda Maaliyadda ee XFS.</li> </ol>
<p><b>CHAPTER 4</b> <b>MISCELLANEOUS PROVISIONS</b></p> <p><b>Article 27</b> <b>Regulations, Procedures, and by-laws</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. The Minister may issue regulations elaborating on the provisions of this law;</li> <li>2. The Authority, to perform its functions, may issue procedures and by-laws that do not contradict this Law and regulations.</li> </ol>	<p><b>Cutubka 4aad</b> <b>Qodobbo Qubane ah</b></p> <p><b>Qodobka 27aad</b> <b>Xeer-nidaamiyeyaal, habraacyo, iyo xeer-hoosaadyo</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1. Wasiirku waxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya qodobbada sharcigan.</li> <li>2. Hay'addu waxay awood u leedahay soo saarista xeer-hoosaadyo iyo habraacyo ay ku fulineyso howlaheeda oo aan ka hor imaanayn Sharcigaan iyo xeer nidaamiyeyaalkiisa.</li> </ol>

<p><b>Articles 28</b></p> <p><b>Offenses related to registration and identification of People.</b></p> <p>1. Anyone who engages in the following acts has committed a crime worthy of punishment in accordance with paragraph 2 of this Article.</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Providing false information or claiming to be someone he/she is not during registration.</li> <li>b. Obstructing someone who is entitled to receiving identity card and number.</li> <li>c. Attempting to issue an ID card illegally</li> <li>d. Counterfeiting the National ID Card</li> <li>e. Using or possessing someone else's identity document</li> <li>f. Lying about the nature and existence of a prior registration</li> <li>g. attempting to register more than once for a new identification</li> <li>h. Disseminating or sharing registration information with another person who has no right to receive such information</li> <li>i. Engaging in any sort of identity theft or fraud;</li> <li>j. All offenses related to document falsification under the Somali Penal Code.</li> </ol> <p>2. Anyone who commits these, or similar crimes will be prosecuted under the Somali penal code</p>	<p><b>Qodobka 28aad:</b>  <b>Faldambiyeedyada La Xiriira</b>  <b>Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga</b>  <b>Dadweynaha</b></p> <ol style="list-style-type: none"> <li>1) Qof kasta oo ku kaca arrimaha soo socda wuxuu galayaa dembi uu ku muteysanayo ciqaabta ku qoran faqradda 2aad ee Qodobkan:       <ol style="list-style-type: none"> <li>a. Bixinta hor-xog aan run ahayn ama sheegasho qof uusan ahayn xilliga diinwaangelinta.</li> <li>b. Ka hor istaagga qof xaq u leh in uu qaato tirsiga iyo kaarka aqoonsiga</li> <li>c. Isku day sameyn kaarka aqoonsiga si aan sharciga ahayn.</li> <li>d. Sameyma nuqul been abuur ah ee kaarka aqoonsiga</li> <li>e. Isticmaalka iyo haysiga kaarka aqoonsi qofkale leeyahay.</li> <li>f. Ka been sheegid diinwaangelin hare loo sameeyay</li> <li>g. Isku day isdiinwaagelin mar labaad ama in ka badan.</li> <li>h. Baahinta ama la wadaagista xogta diinwaangelinta qofkale oo aan shaqo ku lahayn.</li> <li>i. Ku kicista khiyaano kasta oo la xeriirta aqoonsiga iyo diinwaangelinta</li> <li>j. Dhammaan faldambiyeedyada la xeriira been-abuurka dokumenti ee xeerka ciqaabta soomaaliyeed</li> </ol> </li> <li>2. Qof walba oo faldambiyeedyadan ama kuwa la mid ahgala waxaa lagu qaadayaa xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.</li> </ol>
<p><b>Article 29</b></p> <p><b>Conflict of Interests</b></p>	<p><b>Qodobka 29aad</b>  <b>Danaha Iska Hor-imanaaya</b></p>

<p>No one can hold a position or remain in the employment of the Authority, whether a member of the board of directors or an employee, if there is conflict of interest, in accordance with the work regulations of the Authority.</p>	<p>Qofna xil kama qaban karo, mana sii joogi karo hay'adda, ha ahaado xubin Guddi Maamul ama shaqaaie, haddii ay jiraan dano iska hor-imaanaya si waafaqsan habraacyada shaqo ee hay'adda.</p>
<p><b>Article 30 -Repeal</b></p> <p>Any law which contradicts or is inconsistent with the provisions of this Law shall, to the extent of the inconsistency, be void.</p> <p><b>Article 31</b> <b>Coming Into Force</b></p> <p>This Law shall come into force when it is approved by the Federal Parliament and signed by the President of the Federal Republic of Somalia, and is published in the Official Bulletin.</p>	<p><b>Qodobka 30aad</b> <b>Burin</b></p> <p>Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin qodobbada Sharcigan waa la buriyay.</p> <p><b>Qodobka 31aad</b> <b>Dhaqangal</b></p> <p>Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uuna saxiixo :MadaxweynahaJFS laguna soc saaro faafinta rasmiga ah.</p>